



## Ardayda dugsiyada dhexe oo isku yimid si ay uga wadlaan dhanka isirka kaasi oo ahaa Kulankoodii 2-aad ee Codkaaga Ha La Maqlo

Arday ka kala socotay dugsiyada dhexe ee PPS ayaa isku yimiday Kuliyada Bulshada ee Portland toddobaadkii la soo dhaafay kaasi oo loogu talagalay laba maalmood oo wada hadal furan la yeesho iyo iskaashiga hal abuurka ee Kulankoodii Labaad ee Codkaaga Ha La Maqlo 'Raise Your Voices Conference'.

Dhacdada labada maalmood socotay waxaa ku jiray ardayda dugsiyada dhexe oo ka kala socotay Beaumont, Beverley Cleary, da Vinci, Faubion, Harriet Tubman, Laurelhurst, Vernon iyo West Sylvan, oo ay weheliyaan farshaxaniistayaal, dad wax qora, mufakiriin iyo hoggaamiyayaal ka socday dugsiyada sare ee Grant iyo Jefferson. Kormeeraha Guud Guadalupe Guerrero ayaa sidoo kale ka qayb qaatay.

Ka qayb qaatayaashu waxay ka wada hadleen dhanka isirka, xuquuqda gaarka ah, aqoonsiga, sinnaanshaha iyo doorkooda ay ku leeyihiin abuurista dugsiyo iyo bulsho loogu talagalay mustaqbal kii hore ka duwan. Aqoon isweydaarsiyada waxaa gacanta ku hayay farshaxaniistaha/macallinka Bryan Lafaye, Naadiga Dhaqanka ee Dugsiyada Sare ee Jefferson, Youth Educating Police, iyo National Alliance for Filipino Concern.

"Kulankan loogu talagalay ardayda, waxaa soo abaabulay ardayda," ayay sheegtay Liz Kobs, oo ah la taliye ka ah Beverly Cleary oo gacan ka geysatay qabanqaabada dhacdada. "Waxay ardayda dhigaysaa bartamaha shaqada sinnaanshaheena dhanka isirka waxay awood u siinaysaa in ay qayb ka noqdaan isbeddelka."

Dugsiyada dhexe ee daneynaya ka qayb qaadasha sanadka xiga, iyo ganacsiyada diyaarka u ah in ay ku deeqaan waxyaabo ama in ay noqdaan damaanad qadayaal, waa in ay Kobs kala xiriiraan [lkobs@pps.net](mailto:lkobs@pps.net).

[Fiiri sawirro buuxa oo ka socda dhacdada](#)